RIYO KA WAYN

QiSADii KHALiiL



QISADII KHALIIL

lyadoo looga reebay waxyaabaha qaar si ay ugu habboonaato jillidda, haddana markii la soo baadhay ee la xaqiijiyay qisadan dhabta ah waxaa loo soo bandhigay sidii ay u dhacday.

www.morethandreams.org
somalia@morethandreams.org
© 2014 All Rights Reserved

Lamadegaanka Saxaaraha, waqooyiga Afrika

Waxaa halkaa ku noolaa koox Islaamiyiin xagjir ah oo u tababaranayay hal ujeeddo oo kaliya, taas oo ahayd inay afgembiyaa dawladda Masar. Ma jirin kooxdaasu wax kale oo ay danaynayaan oo aan ka ahayn dacwadda Islaamka.



Kuwaa tababaranaya waxaa ku jiray Khaliil, oo ahaa wadaad xagjir ah oo ku fiican shiishka loona tababarayay toogashada.



Habeennimo lamadegaanka dhexdiisa

Kii u dagaallama jidka Alle dartii, ee lagu dilo ama guulaysta waxaan ku abaalmarin doonaa abaalgud wayn.


Mustafe! Walaalkaa wuxuu joogaa jannadii. Waana inaad sidaa qalbiga ku qaboojisato.



Oo hadhihina kuwa jidka Alle loo dilay, way dhinteen.



Maya, way nool yihiin, laakiin idinku ma garanaysaan. Saddaqa Allahul cadhiim.



Wa calaykum assalaam, wa raxmatullahi wa barakaatuhu. Sidee buu tababarku u socday, walaalayaal?





Amiirku marmar ayuu na soo booqan jiray, si uu u hubsado inaan diyaar nahay. Wuxuuna habeenkaa si gaar ah…

Waxaa jirta arin aan rabo inaan idinla qaybsado oo aan ka akhriyay wargays ka soo baxay Qaahira.

Koox hawlwadeenno Masiixiyiin ah oo la xidhxidhay. Waxaana lagu eedeeyay inay ku gaaleeyaan dad Muslim ah Isbitaal ay iyagu leeyihiin iyagoo ku soo jiidanaya shukaansi iyo lacag.

Kufaartu ha dhintaan!

Kufaartu ha dhintaan!

PAW

PAW

Isdajiya, isdajiya!

Ha la dilo!

Waa in la dilo!

Ha la dilo!

PAW

Aamusa!

Taasu waxay annagoo dhan noo ahayd qalbijab.

Waxay ahayd bisha Ramadaan, waxaana dhammaanteen dareennay inaan waajibaadkii Alle gudan waynay.

Waan necbahay Masiixiyiinta.

Waxaan dhaar ku maray inaan soo afjaro bishaarada Masiixiyiinta, qiime kasta ha nagu kacdee, waxaana hayaa talo macquul ah. Ma aha dagaal hubaysan, laakiinse dagaal cilmiyaysan.

Waxaan qoraynaa kitaab xaqiijinaya in Baaybalka la baddalay oo aan la aamini karin.

Oo yaa qoraya kitaabkan?

Khaliil! Qabso kan.

?!

Maya!

Maxaa kugu dhacay? Oo kitaabna miyaad ka baqaysaa?

Hooyaday waxay tidhaahdaa Masiixiyiintu kitaabkan waxay u adeegsadaan jinni bixinta iyo sixirka. Oo qofkii akhriya kitaabkooda jinni baa dardari doona.

Iyo inkaar!

Anigu akhriyi maayo. Maya, maya! Taasu suurtogal ma ahan!

Ha murmin. Khaliil, Alle iyo maalinta qiyaamaha haddii aad rumaysan tahay, waa inaad samayso waxaan ku faro.

Maya, Amiir! Qof kale raadi!

Khaliil! Khaliil!

Amiir, waan ku baryayaa, qof kale hawshan u raadi.

Khaliil, waxaan aaminsanahay in uusan jirin qof kale oo adiga hawshan kaaga fiican.

Laakiin waxaad i leedahay sidooda oo kale u feker, sidooda oo kale noqo. Sideen taas u yeeli karaa? Igu amar inaan dilo dhammaan Masiixiyiinta jooga Masar, laakiin ha i odhan kitaabkan akhri. Taabo xataa ha i odhan!

Sidaad ugu qiiraysan
tahay Alle way muuqataa.
Laakiin qiiradaasu
way ku indho-saabtay.
Waxaana kaa lumay qiimayntii.


Miyaadan arki karin haddii
aad hawshan dhammayso
sharafta iyo xurmada
aad heli doonto?


Waxaad noqon doontaa qofkii
ugu horeeyay ee kashifa
beenta Masiixiyiinta iyo
Yuhuudda.


Waxaad bil kasta gunno
u qaadan shan boqol oo gini.
Aniga qudhayda ayaana kuu keeni.


?!

Khaliil wuxuu ka soo guuray xeradii lamadegaanka oo ku soo laabtay guriga. Waxaa dhammaatay bil isagoon waxba qaban.















Mushrikiin!!
Mushrikiin!!
Boom
Waa inaan adeeco amarka Amiirka.
Waana inaan fuliyo waajibaadkuu i siiyay.
Laakiin xaggeen ka billaabaa?
8


Waxaan akhriyay Tawreedka, waxaana ku arkay meelo yar oo is khilaafsan. Waa hagaag, kuwaasu waxba ma tarayaan sababtoo ah Qur'aankaba waxaa ka buuxa meelo sidaas oo kale is khilaafsan.





Haddii aan nidhaahno is khilaafkan ayaa daciif ka dhigaya Baybalka, markaas waxay noqonaysaa inaan Qur'aankana sidaas oo kale u xukunno.




Waa inaan akhriyo Baybalka oo ka dhex helo khaladaad waawayn.




Dhawr toddobaad ka dib


Waxaan akhriyay Baybalka oo dhan, laakiin kama aanan helin wixii aan filayay inaan ka dhex helo.


Hmm! Waxaan ka raadiyay khaladaad waawayn, laakiin waxba ma aanan ka helin.

Waxaa Khaliil soo booqday Amiirka…

Baybalka kuma jirto hal aayad oo sii sheegaysay imaatinka nabi lagu magacaabo Maxammad, xataa mid la yidhaahdo Axmed.

Waxaan kuu keenay waxaad u baahnayd, Khaliil!

Kitaabkanu wuxuu qorayaa lix iyo labaatan tixraac oo tilmaamaya nabi Maxammad-Sallalahu calayhi wasallam.


Waa tixraacyo ku jira Tawreedka iyo Injiilka.

Maxaad kuwan mar hore ii tusi wayday?

Waxaan rabay marka hore inaad adigu akhrido Baybalka. Markaasna yaaba ka murmi kara waxa aad ku soo gunaanaddo?


Khaliil, wiilkayga, kitaabkan aad qoraysaa wuxuu noqon doonaa mid ka duwan dhammaan kutubtii laga qoray mawduucan. Idinka llaahay, waxaan ka heli doonaa natiijo ifaysa.

Khaliil wuxuu billaabay inuu baadho dhammaan lix iyo labaatankii tixraac ee ku qoraa kitaabka uu ka helay Amiirka.





Rabbiyoow, anigu ma xaqiijin karo in Baybalka la baddalay. Oo ma arkin meel qudha oo Baybalka lagu sheegayo nabi Maxammad. Maxaan anigu u noolahay? Yaan anigu caabudaa?







Hadduu Baybalku xaq yahay, siduu noqonayaa mustaqbalka Qur'aanku? Labaduba xaq ma wada noqon karaan waayo way iska soo horjeedaan.

"Qur'aanku ma Eraygii Ilaah baa?"


Khaliil wuu baraarugay.
Ma xaqiijin karo in Baybalka la baddalay.
Wuxuuna billaabay qoraal cilmibaadhis
ah oo uu ciwaan uga dhigay
“Qur’aanku ma Eraygii Ilaah baa?”







Maalmo ka dib


Waah! Ugu dambayntii waan dhammeeyay
qoraalkan cilmibaadhista ahaa.
Waa saddex boqol oo bog.





Maalintii xigtay Amiirkaa si kadis ah ku soo booqday isagoo maqan.












Dabadeed waxaa yimid Khaliil.
Maxaa kugu dhacay, Khaliil?
Maxaad qoraysaa?
Ma waxaad ii sheegaysaa in Qur'aanku uusan ahayn Eraygii Ilaah?
Haddaadan i aaminayn, adiguba akhri.
Qaylin!
Ma waxaad u malaynaysaa inaan ku faraxsanahay natiijada ii soo baxday? Waxaan kaa baryay inaad arinkan qof kale u xilsaarto, oo mar kastana waxaad igu lahayd Ilaah baa ku doortay! Waa adiga midka eedda luhu, ee ma ahan aniga!
15



Waxaan lacag badan kugu siinay inaad kashifto beenta Masiixiyiinta! Kufaarta!
Maya! Maya! Adigaa ii diray inaan cilmibaadhista sameeyo! Waana sameeyay! Oo kitaabkoodu waa kan xaqa ah! Intaas kaliya maaha, oo xataa Qur'aanka qudhiisa ayaa qiraya in Ciise, Masiixu, uu yahay Ilaah!
Aamus! Aamus! Kuma dhacdid inaad wax kale tidhaahdid!
Wuxuu Qur'aanku leeyahay Ciise wuxuu ku hadlay misaal oo wuxuu ku soo laabmayaa daruuraha korkooda! Wuxuuna xukumi doonaa dadka oo dhan!
Ciise wuxuu awood u lahaa inuu wax abuuro, inuu bogsiiyo bukaanka, inuu soo sarekiciyo kuwo dhintay! Wuxuu ku soo noqonayaa daruuraha korkooda! Oo sida Qur'aanku sheegay maalinta qiyaamaha isagaa xukumi doona quruumaha oo dhan!



AAAAAHHHHHH


Maxaa ka socda qolka Khaliil? Bal aan soo eego!


Waad dilaysaa! Waad dilaysaa!
GGGGRRR


Aniga i maqal, hadda laga billaabo, adiga iyo anigu isma naqaanno. Waana u sheegi kooxda inaad naga baxday, kaafir.



Oo haddaad waxaa maalaayacniga ah cid kale tustana, aniga qudhayda ayaa ku dili doona. Kaafir! Kaafir!


Kaafir! Kaafir!


Maalmo yar ka dib

Waa inaan waco Timoti. Waan aqaanay inuu Masiixi yahay.

Waxaan rajaynayaa inuu yahay qofka ku habboon ee wax iiga sheegi kara Injiilka.



Ahlan wasahlan, Timoti? Waa Khaliil. Maya, xaalku wuu wanaagsan yahay. Balse waxaan muddo dheer doonayay inaan kula sheekaysto.




Waxaan rabaa inaan wax badan ka ogaado Injiilka. Hallo! Hallo!




Maya! Maya! Muxuu telefoonka iigu dhigay?



Oo aaway boorsadaydii? Qof baa boorsadaydii xaday!




Waxaa iigu jiray Baybalkii iyo baasaboorkaygii.



Goor dambe fiidkii

Ilaahayow, i maqal. I tus jidkaaga.
Waxaan rabaa-oo waligay aan rabay
inaan ku aqoonsado oo aan qalbigayga
iyo naftayda oo dhan kuugu adeego.

Waan ku jeclaa tan iyo caruurnimadaydii.
Noloshayda oo dhan waxay ku
jirtaa gacantaada. Ilaahayow, waan
wareersanahay. Waan kuu baahanahay.




Haddaad tahay Ilaaha Muslimka,
Islaamka mooyee wax kale oo
dhan maskaxdayda ka saar. Haddiise
aad tahay Ilaaha Masiixiyiinta,
qalbigayga iftiimi si aan kuu caabudo.
I tus jidkaaga… I tus xaqa…
waan ku baryi Ilaahayow.


Waan ogahay inaad tahay Ilaah kaliya.
Ma waxaad tahay Ilaaha Muslimka
mise Ilaaha Masiixiyiinta?






Habeenkaas, wuxuu Khaliil u seexday si uusan waligii u seexan.
Wali miyaad iga shaki qabtaa?
Adigu yaad tahay?
Waxaan ahayn midka aad raadinayso.
Ma xasuusan karo.
Akhri kitaabka.
Kitaabka waa jeclahay.
Waan ogahay.


Laakiin way iga lumeen isaga iyo waraaqahaygii oo dhan.
Kitaabku ma lumo. Istaag oo kabadhka fur. Halkaasaad ka heli.
Dabadeedna
Kitaabkii wuxuu ku jiraa kabadhka.
21


Hooyo!
SNIFF! SNIFF!
Hooyo, i cafi. Si xun baan kuula dhaqmayay anigoo aaminsan inaan haysto iimaan sax ah.
Maxaa dhacay, Khaliil?
Ilaah baa i tusay runtii. Ilaaha aan maanta aqaanno ma ahan Ilaahii aan caabudi jiray markii hore.
Oo waa kuma Ilaahanu, Khaliil?
Waa Ilaaha runta ah, iskuna muujiyay Masiix… Ciise… sida ku qoran Qur'aanka.
Jooji, gacaliye, haddii lagu maqlo waxaa loo malayn inaad waalatay.
Waan yeeli waxaad i tidhi, laakiin hadalkayga ma aamintay?
Maxaanan kuu aaminayn? Waligaa sidan oo kale iima aadan tixgalin.
Fadlan i saamax, hooyo.

Khaliil qalbigiisii
wuu isbaddalay.
Waxaa baddalay jacayl.



Ha! Ha! Maxaa dareen farxadeed
qalbigayga ka buuxsamay. Waxkasta
oo aan arkay wuu qurux badnaa.





Ha! Ha! Waxaan rabay inaan
hab siiyo oo dhunkado qof kasta
oo aan u sheego inaan jeclahay.



Haa, hadda waa wakhtiga ku habboon inaan u tago
oo la heshiiyo Masiixiyiintii aan dhibay. Waxay
sannado igu yaqaaneen inaan ahay nin
gacanqaad badan oo seef-la-bood ah.



Rabbiga ku ammaana maalintan. Bal hadda aan furo.

Ha iga baqin! Waa aniga Khaliil.

Wali ma aanan furin.

Waxaan u imid inaan kula hadlo. Fadlan, waxaan rabaa inaan cafis ku waydiisto.

Maya!

Fadlan, waan is baddalay. Ma ihi qofkii hore. Waan is baddalay. Gaf baan kaa gali jiray waayo Masiixi baad tahay.

I cafiyaa? Waan is baddalayaa?


Fadlan i cafi.


Haleluuya!


Fadlan i cafi.


Waan ku cafiyay.


Khaliil waxaa ku dhacay isbaddal. Dadkii yaqaanay oo dhan way arkeen isbaddalka ku dhacay noloshiisa.














Waxaan ahaa nin nacayb ka buuxo, oo dilaa ah. Waxaan gubay kaniisado oo dukaammo ayaan dhacay. Dhibaato badan ayaan sameeyay, laakiin Masiixa ayaa noloshaydii baddalay.



Hadda xor baan ahay. Wiilka ayaa i xoreeyay. Waagii hore, dhimashadu waxay ii ahayd wax xun, oo argagax leh, laakiin hadda dhimashadu ima xukunto. Hadda waxaan ku jiraa Masiixa oo wax kastaaba way cusub yihiin.

